



Fariintan waxaa dhowaan lagu qori doonaa Af Ingiriisi, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, Tiếng Việt barta <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Oktoobar 10, 2022

Ku socoto: Bulshada Naafanimada Garaadka/Korriinka (I/DD) iyo La Hawlgaleyaasha Qabaa'ilka

Ka socoto: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka

Mawduuca: Ogeysiiska hoggaanka ODDS ee muhiimka ah

Waxaan kuugu soo dirayaa warqaddan inaan kula wadaago inaan aqbalay jago cusub oo aan ka tagi doono Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka (ODDS). Waxaan ka mahadnaqayaa inaan ku shaqeyay jagada maareeye barnaamij oo taageera in ka badan 32,000 oo reer Oregon ah oo qaba naafanimada garaadka iyo korriinka (I/DD).

Shaqada aan qabanay waxay ahayd mid adag. La-hawlgalayaal ahaan, waxaad si firfircoon ula shaqeysay ODDS si ay u bixiso talooyin iyo aragtiyo lagu horumarinayo natiijooyin loogu talagalay dhammaan dadka reer Oregoniyiinta ee qaba naafanimada garaadka iyo korriinka (I/DD).

Waxyaabaha aan ku guuleysanay aad ayay u tiro badan yihiin. Haddii aan halkan ku xusno waxaa macquul ah inaynu ka tagi karno wax muhiim ah. Nidaam ahaan, waxaan sidoo kale la kulannay caqabado iyo niyad-jabyo. Aad baan ugu hanweynahay sida aan waqtiyadaan wax uga baranay, ula jaanqaadnay ugana gudubnay. Waxaan u dabbaaldegayaa guulihii qarameed ee aan wada gaarnay. Waxaa sidoo kale jira wax badan oo harsan. Waan ogahay inaad ka wadashaqayn doontaan si dardar leh u sii wadi doontaan.

Aniga ahaan, waxaan jago ka aqbalay shirkadda la-talinta, Health Management Associates (HMA). Waxaan ugu horrayn kala shaqayn doonaa waax-hoosaadka HMA Burns & Associates, la-talinta ku saabsan hirgelinta siyaasadda iyo nidaamyada.

Maalinta ugu dambeysa ee aan ODDS ka shaqayn doono waxay noqon doontaa Khamiista, Noofembar 10. Waxaan waqti ku bixin doonaa toddobaadyada soo socda taageerida hoggaanka ODDS, la-hawlgalayaasha bulshada iyo shaqaalaha inta lagu jiro kala-guurkan. Oregon Department of Human Services waxay dhowaan ku dhawaaqi doonaan maamul ku meel gaar ah.

Waad ku mahadsan tihiin sannadaha sida daacada ah aad iila shaqayseen. Mid kasta oo idinka mid ah waan u mahadnaqayaa. Waan ogahay in bulshada naafanimada garaadka/korriinka (I/DD) ay sii wadi doonto inay sameeyaan la qabsi iyo isbeddel si ay

u caawiyaan dadka qabanaafonimada garaadka/korriinka (I/DD) si ay ugu kobcaan gudana Oregon.

Daacadnimo,



Lilia Teninty  
Agaasime  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Kobaca (ODDS)

*Farriimaha Agaasimihii Hore ee ODDS waxaa laga heli karaa barta <http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>*

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo booqo mareegtayada.*

Waxaad ku heli kartaa dukumintigaan luuqado kale, daabacaad balaaran, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay. Kala xiriir Oregon Office of Developmental Disabilities Services lambarka 503-945-5811. Waxaan ka aqbalnaa wicitaanada dhammaan noocyada adeegga gudbinta ee loogu talagalay dadka dhegoolaha ah, kuwa dhegaha-indhaha la', kuwa dhego culus ama leh naafo xagga hadalka ah. Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegga gudbinta booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).